



San Diego City Schools



Fasalka: _____

Magaca Ardeyga Far Waaweyn ku Qor

OGEYSIINTA WAXYAABAHA AAN NIDAAMKU MARNA U DULQAADAN KARIN.

Guddiga Waxbarashaddu waxay ansaxiyeen Nidaamka ku saabsan waxyaabaha aan marna loo dulqaadan karin ee hoos ku qoran:

- Ardeygii hub isticmaala amaba lagu arko isagoo haysta dugsiga waa laga eryeyaa. Hubkaas waxaa ka mid ah qoriga (buntukha), tamuujad (bastoolad) koobbi asalkeedu la mid yahay, tamuujadaha dadka lagu tartansiiyo, buntukha wax dawakhiya, qoriga soodhka leh, mindida nooc kasta ha ahaato ama xajmi kasta ha lahaatee, ableyda (toorida), nooc kasta oo tooriyaha ka mid ah, sakiinta gadhka lagu xiirto, siddada suunka qoriga la gashado, wax kasta oo qarxa ama rashka. Hadaba walxahaas kor ku qoran oo si khatar ah loo isticmaalo waxaa laga soo qaadenayaa inuu hub yahay.
- Ardeygii ku tallaabsada fal dagaal la xidhiidha ama qof kale dhaawac culus u geysta dugsiga ayaa laga burin doonaa.
- Ardeygii isku deya amaba sameeya fal xun sida isku deyista iyo faraxumeynta ama taabta dharka iyo jidhka qof kale oo sharcigu ka xaaraantimeeyey dugsiga ayaa laga burin doonaa.
- Nidaamka u dejisan waxabarashadda degmadu ma oggola isticmaalka KHAMRIGA, SIGAARKA iyo MAANDOORIYEYAASHA kale toona. Haddii walxahaas meelaha laga mamnuucay laguugu arko adiga oo haysta amaba iibineya inta la oggol yahay in ka badan, marka koowaad dembigaas waxaa lagu talineyaa in dugsiga lagaa eryo. Marka saddexaadna haysashada walxahaas amaba isticmaalkoodaba waxaa lagu talineyaa in dugsiga lagaa eryo marka sigaaraka laga reebo. Haddiise mar afraad laguugu arko inaad sigaar haysatid waxaa lagu talineyaa in dugsiga lagaa eryo.
- Waxaa arrimahaas anshaxa la xidhiidha oo weheliya ku tallaabsiga sharciga oo aad jebiso, taas oo sababi karta in lagu xidho ama lagu geeyo xabsiga dhaqan toosinta ee carruurta loogu talagalay.
- Haddii lagaa buriyo Dugsiyada Magaalada San Diego waxay arrintaasi kuu sababi doontaa in dugsiyada caadiga ah lagu diido, kedibna lagu meeleeyo dugsiyada barnaamijyada gaarka ah leh.
- Haddii uu ardeygu dembi ku sameeyo dugsiga dhexdiisa ama meel dugsiga ka baxsan, nidaamka waxyaabaha aan loo dulqaadan karin wuxuu ku talineyaa in ardeygaas dugsiga laga eryo.
- Ardeyga dembi ku sameeya dugsiga bannaankiisa wakhtiga qadadda ama ardeyda loo kaxayneyo hawl gal uu dugsigu dammaanad qaadey waxaa lagu talineyaa in dugsiga laga buriyo.
- Ma jiraan waxyaabo cududaar u noqoneya jebinta sharciyadan. Sidaas darteed, waxaa nidaamka wax u dulqaadasho la'aanta ah loo soo dejiyey inay dugsiyadu noqdaan goob iyo xarun nabadeed, isla mar ahaantanna, adiga iyo kuwa kula midka ahba wax loogu dhigo.

Waxaan yiqiinsanahay in ardey kasta uu fahmey, isla markaasna, akhriyey nidaamka waxyaabaha aan marna loo dulqaadan doonin. Ardey kasta nidaamkan waa la ogeysiyeey, waxaan aaminsanahay inay ardeydu garan doonto natiijada ka iman karta jebinta nidaamkan qoran.

Saxiixa Waalidka

Saxiixa Ardeyga

Taariikhda